
Dugsiyada Dadweynaha Boston

Badbaadada iyo Amniga Guudmarka Kooxda Taageerada Istaraatiijiga ah

Ray Hart iyo Willie Burroughs

Janaayo 18, 2023



Ajendaha



- **Guudmarka**
 - **Natijoooyinka Hawlgallada**
 - **Talooyinka**
 - **Su'aalo iyo Jawaabo**
-

Macnaha guud



- ❖ Systemic Improvement Plan (Qorshaha Horumarinta Nidaamka, SIP), oo ay si wadajir ah u saxiixeen Duqa Magaalada Boston, wakiilo ka socda BPS oo ayna aqbaleen Massachusetts Department of Elementary and Secondary Education (Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Dugsiga Sare ee Massachusetts, DESE), waxa uu sharraxayaa hindisayaal iyo waxqabadyo taxane ah oo lagu taageerayo badqabka jir ahaaneed, bulsho ahaaneed, iyo shucuur ahaaneed ee ardayda si loo xaqiijiyo deegaan dugsi oo ammaan ah.
 - ❖ Marki ay ahayd Diseembar 31, 2020, Guddoomiyaha Massachusetts waxa uu sharci u saxiixay “Xeer La Xiriira Caddaaladda, Sinnaanta iyo La Xisaabtanka Sharci Fulinta Commonwealth” Hindise Sharciyeedka S. 2963 (Sharciiga Dib-u-habeynta Booliska). Sharciiga awgiis, waxaa jiray awoodaha booliska oo meesha ka baxay oo ay ruqsad siiyeen BPD sida ku hoos xusan Xeerka 400A ee BPS.
-

Natiijooyinka Muhiimka ah - Hambalyayno



- ❖ Kooxdu waxa ay ilo badan ka maqashay in Guuleysiga Barnaamijka Wax Kaqabashada Xoog-u-sheegashada ee Boston uu yahay barnaamij aanan ciqaab ahayn oo hab wax ku ool u ah BPS (sida, khabiirka wax kaqabashada xoog-u-sheegashada oo jooga dugsi kasta).
 - ❖ Madaxa Adeegyada Badbaadada waxa uu si weyn ula hawlgalaa bulshada BPS waxa uuna si firfircoon u baadi goobaa ra'yi celin ku saabsan arrimaha la xiriira badbaadada.
 - ❖ Khuburada Badbaadada waxa ay u muuqdaan inay u heellan yihiin shaqadooda oo kalgaceyl u hayaan inay ugu adeegaan ardayda siyaabo wanaagsan (tusaale ahaan, Khuburada ka qeyb galaya dacwadaha maxkamadda iyo u doodista ardayda).
 - ❖ Taliyaha Booliska BPD waxa uu muujiyey damac ah inuu qeyb ka noqdo xalka badbaadada dugsiya, rabitaan ah in uu la macaamilo ardayda, iyo ka go'naanshaha wax ka qabashada arrimaha iyada oo loo marayo kala-duwanaanta halkii laga maxkamadeyn lahaa.
-

Natijoooyinka Hawlgallada

Adeegyada Badbaadada

Natiijooyinka Muhiimka ah

- ❖ Wakhtiga lagu soo xulayo oo musharraxiintana lagu barayo jagooyinka amniga ayaa aad u dheeraa. Taa awgeed, musharraxiinta waxa ay heleen fursado kale inti ay sugayeen go'aannada soo shaqaaleysiinta ee BPS.
 - ❖ Shaqaalaha kambaaska waxa ay sheegeen inay wakhti badan ku bixiyaan wax kaqabashada walaacyada badbaadada ee kajira dugsiga, oo ka qaadatay wakhtigi ay ku bixinayeen fasalka dhexdiisa (tusaale ahaan, ka beddelka doorka sarkaalka booliska oo loo beddelayo khabiirka badbaadada).
 - ❖ Hindiso Sharciyeedka Dib-u-habeynta Booliska waxa uu sababay jahwareer ku saabsan doorarka iyo mas'uuliyadaha u dhexeeya BPD iyo BPS.
 - ❖ Ma jirto wadashaqeyn ku filan oo ka dhaxeysa IT-ga iyo Xarumaha baahiyaha tigniyoolajiyadda
-

Talooyinka

Adeegyada Badbaadada

Talooyinka



- ❖ Ku dhiirigelinta Kormeeraha Guud iyo Taliyayaasha BPD inay si iskaashi leh uga wada shaqeeyaan horumarinta iyo hirgelinta MOU/IGA wadaag ah oo ku lug leh fikradaha ka imaanaya saamileyda bulshada. Ugu yaraan, heshiiska waa inuu --
 - Mudnaanta siiyaa fursadaha loogu talagalay booliska inay ku dhisaan cilaqaad wanaagsan oo ay la yeeshaan ardayda; iyo
 - Qaabeeyaa hannaan lagu wadaago macluumaadka.
 - ❖ Abuuritaanka koox diiradda saarta saamileyda ku habboon iyo maamulayaasha si ay uga fakaraan haddii BPS ay tahay inay sameyso waax boolis gudaha ah, oo la dhaariyey.
 - ❖ Uga baahashada Adeegyada Amniga ee BPS inay si aad ah ugu lug lahaadaan hannaanka shaqaalaysiinta si ay gacan uga geystaan yareynta wakhtiga ay qaadanayso in lagu xusho waxna lagu baro musharraxiinta.
 - ❖ Waajibinta in diiwaanada sharci fulinta, sida ay aqoonsatay FERPA, ay hoos tagaan maamulka iyo kormeerka Adeegyada Badbaadada.
-

Talooyinka



- ❖ Helitaanka nidaamka khadka caawinta ee soo sheegista qarsoon ama shey softiweer ah si loogu dhiirrigeliyo soo sheegista habdhaqanada aan habbooneyn iyo kuwa khatarta ah ee la filayo.
 - ❖ Wax kaqabashada arrimaha niyadsami xumida ah ee waaxda Adeegyada Badbaadada iyadoo la dhiirrigelinayo koox dhisida, kulamada toos ugu kuurgalidda ah, iyo fursadaha horumarinta xirfadeed.
 - ❖ Mudnaan siinta doorarka iyo mas'uuliyadaha ee dhammaan qeybaha waaxda si loo hubiyo in shaqaaluhu diiradda saaraan badbaadada ku saleysan dugsiya iyo dhaqamada booliska, ee aan ahayn waajibaadka sida caadiga ah ula xariira howlaha booliska ee magaalada ama degmada. Soo shaqaaleysiinta ama kor u qaadista maareynta heerka dhexe ee u istaagi doona qaababka booliska ee ku saleysan dugsiya.
-

Talooyinka



- ❖ La shuraakoobidda Waaxda Kheyraadka Shaqaalaha si --
 - Loola socdo heerka shaqo ka tagista shaqaalaha, loo sameeyo borotokoollada wareysiga bixitaanka oo loogu talagalay waaxda shaqaalaha ee iskooda isaga taga BPS, iyo la socodka iyo dabagalka sababaha keenay tagitaanka si loo aqoonsado fursadaha la sameynayo ama isbeddellada lasoo jeedinayo in lagu sameeyo siyaasadda;
 - Dib u eegis loogu sameeyo, dib loogu qoro, loo cusbooneysiyo, loona qeybiyo sharraxaada shaqada si ay uga tarjumaan doorarka iyo mas'uuliyadaha hadda jira si loo xaqiijiyo isla xisaabtanka iyo waxqabadka;
 - Loogu casuumo Waaxyaha Wadaxariirada iyo Kheyraadka Shaqaalaha inay qorsheeyaan oo ay shaqaalo keenaan fursadaha shaqaaleysiinta ee socda oo ay ka faa'iideystaan isgaarsiinta ballaaran iyo qaababka warbaahinta bulshada si degmadu si guul leh u buuxiso shaqooyinka bannaan ee hadda jira.

Mahadsanid

Su'aalo iyo Jawaabo
